

## Halkee ayaan u raadsadaa macluumaad badan?

La xirii xafiiska Xiriirada Nolosha Bulshada/xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga – waxaad ka heli kartaa goobaha iyo telefoon lambarada mareegtada [www.waclc.org](http://www.waclc.org) hoosta qeybta Xiriirka ama wac telefoonka bilaashka lagu waco ee 1-855-567-0252.

Ama booqo [www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources](http://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources) si aad u hesho macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijyadan iyo khayraadyada kale ee daryeelaha.

*Adeegyo iyo taageero*

*xaddidan oo wakhtii*

*go'an la bixiyo*

*ee loogu talagalay*

*shakhsiyaadka iyo*

*daryeelayaashooda*

*waxaa ay ku*

*caawinayaan dadka*

*in ay ugu noolaadaan*

*nolol madax-bannaan,*

*caafimaadqab leh*

*guryahooda.*

## Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid iyo Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweynka ah

*Daryeelayaasha aan lacagta qaadan waa lafdhabarka adeegyada*

*iyo taageerada aan bixinno muddada dheer. Adeegyadan waxaa*

*loogu talogaley in ay ku caawiyaan daryeelayaasha aan lacagta*

*qaadan in ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ayu sii*

*bixiyaan daryeel tayo*

*sare leh iyo in ay*

*xoogga saaraan*

*caafimaadkooda iyo*

*ladnaantooda.*



Gobolka Washington waxaa uu bixinayaa laba siyaabood oo dheeraad ah oo lagu taageerayo dadka waaweyn ee u baahan caawimo si ay guriga ugu noolaadaan. Barnaamijyadan, ee hoos lagu sharxey, waxaa ay taageeraan daryeelayaashooda qoyska ee aan lacagta qaadan ama waxaa ay taageeraan shakhsiyaadka aan hadda haysan daryeele aan lacag qaadan. Xafiiska Xiriirada Noloshada Bulshada ama xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga waxaa ay bixin karaan macluumaadka dheeraadka ah ama waxaad macluumaad ka heli kartaa online-ka.

## Waa maxay waxa ay bixiyaan barnaamijyadan?

Labada barnaamij waxaa ay bixiyaan adeegyo iyo taageero kala duwan ee aad xaq u yeelan karto, oo ay ka mid yihiin:

- Maamulka hawl-guriyeedka iyo adeegyada gaagaaban
- Kooxo taaageero iyo la-talin
- Qalabka ama sahay caafimaad oo gaarka ah
- Ikhtiyaarada goobaha sida ku meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka
- Fursado tababar
- Caafimaad Maalintii ee Dadka Waaweyn ama Daryeelka Maalinta ah ee Dadka Waaweyn
- Macluumaadka ku sabsaan daryeel bixinta, khayraadka bulshadaada, adeegyada la heli karo iyo waxyaabo badan.



Hoosta **Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweyn**, adeegyada gargaarka shakhsi ahaaneed (oo ay ka mid yihiin daryeelka shakhsi iyo kalkaalisada) waa ikhtiyaar dheeraad ah, beddelkii goobaha sida ku meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka, ee loogu talogaley dadka waaweyn ee aan haysan daryeele, ee jira da'da 55 ama ka weyn, kuwaas oo ka soo baxa shuruudaha shaqada iyo maaliyadda.

Qofkee	Magaca Barnaamijka	Shuruudaha Da'da	Shuruudaha Medicaid	Shuruudaha Kale	Heerka Dheefta
<b>Daryeeyaasha</b>	Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC)	Qofka daryeelka helaya waa in uu jiro 55+ daryeelahana waa in uu jiro da'da 18+.	Waxaa ay u baahan tahay in daryeel qaataha uu hadda ku jiro Apple Health (Medicaid).	Qofka daryeelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.	Ayada oo ay ku tiirsantahay xaaladaada, waxaad qaadan kartaa mid kamid ah seddex heerar oo kaladuwan oo adeego iyo taageero ah.
<b>Daryeeyaasha ama Dadka Waaweyn ee aan haysan Daryeele</b>	Taageerada Habboon ee Dadka Waaweyn (TSOA)	Qofka daryeelka helaya waa in uu jiro 55+ daryeelahana waa in uu jiro da'da 18+.	Xaq u yeelashada Medicaid shuruud ma ahan. Dakhligaaga iyo ilooyinkaaga dhaqaale waxay noqon karaan kuwo ka baddan tirada Medicaid. Shaqaale ayaa kugu caawin doona go'aansashada u qalmitaankaaga dhaqaale.	Qofka daryeelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.	Ayada oo ay ku tiirsantahay xaaladaada, waxaad qaadan kartaa mid kamid ah seddex heerar oo kaladuwan oo adeego iyo taageero ah.